R&PUBLIC OF SOMALILAND

FORM FOUR  EXAMS, 2023

# AF-SOOMAALI

2023

NATIONAL EXAMINATION BOARD

SomExams

[redacted]

Wadarta guud

Magac: ..........................................

Dugsiga: ........................................

Roll No: ........................................

# JUMHUURIYADDA SOOMALILAND
## GUDIDA IMTIXAANAADKA QARANKA SOOMAALILAND
## FASALKA AFRAAD

# AF-SOOMAALI

**2023**

**WAKHTIGA: 2 SAACADOOD**

**10 daqiiqo oo dheeraad ah ku akhri dhammaan waraaqaha si aad u hubiso.**

**TILMAAMO:**

Imtixaanku wuxuu ka kooban yahay **12** waraaqood oo daabacan.
Tiri imika, oo wergeli horjoogaha haddii ay wax ka maqan yihiin ama dheeraad yihiin.

Imtixaanku waxa uu ka kooban yahay 5 qaybood:

| | | |
|---|---|---|
| **QAYBTA 1AAD:** | **SHEEKO IYO EREYO** | **30 DHIBCOOD** |
| **QAYBTA 2AAD:** | **MAANSO** | **15 DHIBCOOD** |
| **QAYBTA 3AAD:** | **AF-MALDAHANAHA** | **15 DHIBCOOD** |
| **QAYBTA 4AAD:** | **MAAHMAAHYO & HEES HAWLEEDYO** | **10 DHIBCOOD** |
| **QAYBTA 5AAD:** | **NAXWE** | **10 DHIBCOOD** |
| **QAYBTA 6AAD:** | **CURIS** | **20 DHIBCOOD** |
| | **WADARTA DHIBCAHA GUUD** | **100 DHIBCOOD** |

Dhammaan waa laga shaqaynayaa qaybta 1, 2, 3, 4, 5 iyo 6aad.
Lama ogola Moobayl iyo waraaqo kale

## QAYBTA KOOWAAD: SHEEKO (30 Dhibcood)

## AKHRI SHEEKADAN DABADEED KA JAWAAB WEYDIIMAHA KA HOOSEEYA

Muddo hadday qoortu kor ugu taagnayd oo falalkiisii silloonaa iyo magaciisiiba bari iyo bogox lagaga haasaaway ayuu maalintii dambe geelooda dhexdiisa kadalloob u fadhiistay. Hammi baa ku soo kordhaye, dhulkii buu jifeeyey. Hal iyo faras baxdow ah ayaa mooradiisii ka batay. Barbaar turuqyo waaweyn oo wada okobbanna garabkiisa ayuu ku arkay, kolkaas buu istaawiyey rag inuu wax dheer yahay, ayna la ahaatay bili adduun inuu u soo maray. 'Maxaa kaa maqan?' ayuu isweyddiiyey. 'Allaylehe, doobnimo laga roone, waa ruux dumar ah oo aad alkumato' ayuu naftiisa ugu jawaabey. Hawo guur baa ku soo korodhay. Oo tolow, tee buu gaataa, dadse yuu kala xididaa? Tashi buu bilaabay. Oo duqow iyo abwaanno uma bayrine, da'yartii ay isku gedaha ahaayeen ayuu u leexday. Wuxuu goostay inay noqoto milgo iyo qurux, geyiga Ciideed, inanta lagu kuunyo. Dhaban dumar loogu xisho ha ku tilmaannaato. Magaceedu mid ay safruhu ku haasaawaan ha ahaado. Ha ku aroorto qoys xoog leh oo awood iyo wardheeriba loo daayey. Meel alla meeshii dab ka bidhaamayeyba dhallinyaro ayuu u diray. Ciid oo idil ayay cagta soo mariyeen; iyaga oo indho-inadhaynaaya inantii Mataan-ciideed u qalmi lahayd.

Ina-hebeshii loo soo sheego wax uu ka maagto oo meel ka dhalliiloba, ugu dambaystii ayaa barbaar geenyo qodban ku joogaa uu geedkii uu fadhiyey kaga degey. Wada-hadal gaaban ka dib waxaa la milicsaday Mataan oo ilko-caddaynaaya oo aad mooddo safar dagani inuu u muuqday!! Waxaa la arkay Mataan oo muusoonaaya. Mataan oo boodboodaaya sidii uu yahay canug aan weynaan oo wax ka lumay ciidda ka dhex-helay! 'Allaylehe, gabadha laguu sheegay way kuu qalantaa. Reer la yaqaan way ka dhalatay. Bilic aan dumar loogu wada deeqinna waa loogu deeqay, laguna galladay, qorshe iyo quluudna waa lagu tibaaxay. Waa inan kibir iyo qabba lagu sheegay. Waa inan rag oo idil cagaha isugu dhufatay. "Hebel bay diidday, hebel kalena waa tii aabbahay buu iga yahay tiriye, malaha adiga ayuun bay ku sugaysey. Qoodhay iyo xeraday maanta ayaa guur kuu eg yahaye isbandhig oo, doobnimo lama ammaanine, reer yeelo" Mataan baa sidaas naftiisa kula shawray.

Oo guur waa doonis iyo la-bixide, labada tabtee buu raacaa? 'Illeen xodxodo iyo afgarasho ayaa ka horraysa, gabadhana hadal idiinma horraynine, la-bixid iyada haba soo qaadin. Midda kale, tabta la-bixidda waxaa u irkada nin cayr ah oo xoolo adduun ku yar yihiine, maxaa Mataan uga dan ah? Inuu doono ayay talo kaga dhammaatay. Raggiisii kuwii uu ugu kalsoonaa ayuu uruursaday. Qoyskii ay Salaado ka dhalatay ayuu fardihii u heenseeyey, wuuna u dadab-galay. La isma haybsan oo waa la isyaqaan. Isna ma leexleexannine, inuu Salaado doonaayo ayuu diirka ka qaaday. Dumarka oo la isu diidaa xeer ma ahayne, waa lala xaajooday oo loo carrab-laallaadiyey. 'Geel iyo fardo iyo yarad immisa ayaad bixinaysaa?' dooddu kama joogin oo lagu murmi maayo. Waxaa la ogaa Mataan inuu ahaa wiil-hoog ammaan jecel oo diyaar u ah rag inuu ka fooro, xididkana uu wax lagu sheekaysto guddoonsiin doono. 'Hawraarsan' baa codsigiisii lagaga jawaabey, Salaadona waa la siiyey. Yarad mayro geel iyo gammaanba leh oo baxdowgiisii Seed la baxay uu ku jiro ayuu u soo laameeyey. Maro-weyntii Faarax Afey


©SLNECB, 2023

lahayd, Cali-dhan lahayd oo Nuur-jiir lahayd, Salaadona ay jifada ahaayeen ayuu tacabkaas xeryaha ugu shubay. Iyaguna wixii xidid laga filan jirey oo qalqaalo ah ayay ku dhaqaaqeen.

Raggu ha wada hadlo, gabar ha la isa siiyo, yaradna ha la kala qaatee, tolow, Salaado arrintu halkee bay ka taagnayd? Maxaa madaxeeda ku wareegaayey? Inuu Mataan soo doonay oo hablo oo idil iyada ka doortay ma gallad bay u qaadatay, mase laba-caloolyow baa ku dhacay? Waxay istiri, 'waxa geyiga Ciideed rag ku dhaqan, maxaa, tolow, ninkan kaaga soo soocay?' Su'aashaas ayaan, aniguna, jawaabteeda toyday, waxaana ku-tiri-ku-teen igu soo gaadhay dadab-galkii horeba inay doonistii Mataan ka mayiigtay. Dumar iyo rag mid ay kula sheekaysatayba, waxay ka ergeysey ninkaas laqanka oo habaar mooyee aan dhankiisa waana duco loola jeensan in la weydaarsho. Malahayga, waxay ka cabsi-qabtay carruurta ay dhali doonto habaarkaas Mataan ku larani inuu fac-ka-fac ka hari waayo.

Hase ahaatee, ha ka mayiigtee, diidmo uma bannaanayn. Wax walba oo rag ku heshiiyey waxay ahaan jirtey inay dumarku raacaan oo, rabbi iyo ragba wixii ay ku taliyaan, marna kama ay hor-imaan jirin. In kastoo raggii hore qaarkood ay yaradka iyo aayaha hablahooda ay kolkol yaradka u xilan jireen, haddana run ma ahayn waalidka iyo jifadu halka ay gabadhoodu ku socto aanay u meelo-deyi jirin. Salaado oo taas maaanka ku haysa ayay 'hawraarsan' tiri.

Aqal aan aqallo u ekayn ayaa loo dhisay. Kashkaash iyo dermo ladan oo raaxo loogu gam'o ayaa loogu goglay. Qunbeyaal subag ah iyo tebbado oodkac ah ayaa gasada loo dhigay, si diihaalka gaajadu uu agagaarkaba uga fogaado. Fardaha ayaa lagu dabbaaldegey oo laga dul-geeraaray. Ammaantii gabadha ayaa lagu dheeraaday. Dhallinyarada ayaa sacabka iyo jiibka isla heshay, Salaadona goor fiid ah oo dayaxu sagaal iyo kow iyo toban u dhexeeyo ayaa Mataan-ciideed aqalkii loogu soo hooyey. Aroos-gobeed buu ahaa, maxaase ka dambeeyey?

Faanfaan ma ahee, dulucda guurku waa taranka aadanaha oo loo diidaayo inuu tirmo. 'Qabbiltu'da meherka Cali iyo Caasha waxaa looga gol leeyahay, dhimasho ka dib, inaan magacooda ifka lagu xusi waayin. Mashxaradda arooska ugu dambaysa waxaa lagu xijiyaa ducada caanka ah ee ay wiilka iyo caanuhu ku sheeggan yihiin. Raas-weyn inay noqoto oo 'abaydin abaydin gaarey' lagu gallado ayay culimmadu gabadha ugu ducaysaa, sayganа inuu Eebbe bayaxow uga dhigo ayay xigtaduna u rajeeyaaan. Macnaha guurku leeyahay, isweheshiga ka sokow, waa carruurta labka iyo dheddiggaba leh ee uu reerku reerba ku noqdo. Mataan-ciideed wiilkaas la baxay ee Salaado guursaday, isaga, tolow, xigmaddaasi ma u muuqatay? Arrintase sidaas ma u galay? Wuxuu ahaa nin ku dhaqma wax kasta oo aan dadka kale ku dhaqmin. Wuxuu ahaa nin ay la kharaarayd inuu uunka kale la mid noqdo; nin la jeclaysiiyey inuu dadka ka duwanaado. Waxaa la xumaatay sida dadka kale intuu haweeney guursado oo la aqal-galo inuu carruur Eebbe ka tuugo oo ay hooyo iyo aabbe ay wiilal iyo gabdho u noqdaan! Wuxuu ku tashaday guurkiisu mid sheeko reeba inuu ahaado. 'Mataan baa guursaday, wax lala yaabaana ma dhicin' way u cuntami weydey. 'Dhibaato kasta, dad iyo duunyoba, waad u geysatay, welina itaal-rag waad tahaye, yaan wacdarahaagu isdhimin' ayuu ku


©SLNECB, 2023

tashaday. 'Guurkaagu ha noqdo mid aan isaga oo kale weligeed la arag, eed kastaa ha ka timaaddee' ayuu naftiisa kula heshiiyey.

Laba-saddex habeen kolkii ay Salaado iyo Mataan sidii laba nin u wada joogeen ayuu fiidkii dambe daboolka uga qaaday tashigii uu sheydaanku laabta ugu tiray. Wixii uu ku tashaday waxay ahaayeen: sidii nin iyo afadi inay aqalka ugu soo wada hoydaan, sidii laba ninna ay u wada noolaadaan! Waa wax aan taariikhda guurka weli soo marin. War oo idil wuxuu ugu soo koobay, "Salaadoy, boqorka Ciideed ayaan ahay, adiguna marba haddaad afadaydii noqotay, haweenka Ciideed ayaad boqorad u tahay oo, maanta ka dib, Salaado-ciideed weeye magacaagu. Salaadoy, boqor iyo boqoradi inay wax iska doontaan waa ila liidasho, wallac, uur, ummul iyo jilicsanaan dumar maxaad ku fali? Ubad aad daadiso iyo ilmo aad araxda ku xanbaarto waan kaala han weynahay! Inaan sidaas ku wada joogno, sheedda iska dhawranno, iskana sheekaysanno ayaa inoo guddoon ah!"

**B. Goobo geli weedh kasta jawaabta ku saxda ah (20 dhibcood)**

1. Sababta uu Mataan xaaskiisii Salaado u bahdilayey waxa ay ahayd
   a) Hadallo diidmo ah oo salaado laga keenay markii uu guurka ka doonayey
   b) Nacasnimo iyo macangagnimo Alle u dhaliyey
   c) (a) iyo (b)
   d) Midnaba

2. Mataan Ciideed markii uu ku dhashay hammiga guurku, arrintiisa waxa uu kala tashaday
   a) Niman abwaanno ah
   b) Barbaartii ay ilmaadeerka ahaayeen
   c) Da'yartii ay isku gedaha ahaayeen
   d) Waalidkiisa gaar ahaan Aabihii

3. Gabadha uu rabay inu guursado waxa uu shuruud uga dhigay inay lahaato dhawr tilmaamood oo ay ka mid yihiin
   a) Dherer, dhexyar, iyo midab maarriin ah
   b) Dhaban, Qoys magac iyo awood leh
   c) Gaarinimo, Dhabeelnimo iyo karti
   d) Midna

4. Salaado iyo Mataan guurkoodu waxa uu ahaa
   a) Doonis
   b) La bixid
   c) Dhabar garaac
   d) Midnaba


©SLNECB, 2023

5. Yaradka uu Mataan ka bixiyey Salaado waxa ku jiray
    a) Fardo
    b) Geel
    c) Dameero
    d) (a) iyo (b)

6. Salaado guurka Mataan waxa ay u arkaysay
    a) Libin u soo hoyatay
    b) Qallad iyo nasiib darro ku dhacday
    c) Calafkeedii oo aanay iyadu calman
    d) Midna

7. Dulucda iyo ujeedka guurku waa inu qofku ka helo waxyaabo badan oo ay ugu weyn tahay
    a) Taran ifka kaaga hadha
    b) Xaas dhib iyo dheefba kula qaybsata oo nolosha kuugu wehel yeesha
    c) Faan iyo tookh
    d) Midna

8. "Laba saddex habeen markii Salaado iyo Mataan sidii laba nin u wada joogeen" waxa looga jeedaa
    a) Gabadha xaggeedaba uma uu kicin
    b) Sidii nin fariid ah oo kale ayuu tixgelinayey
    c) Kalgacayl xad dhaaf ah ayuu tusay
    d) Midna

9. Hab-dhaqanka Mataan waxa ka muuqda inu ahaa
    a) Nin macangag ah aadna u maskax yaraa
    b) Nin jecel in laga sheekeeyo oo uu mahadhooyin reebo
    c) Nin aan maskax ahaan caafimaad qabin
    d) (a) iyo (c)

10. Mataan sida sheekada ka muuqata waxa uu ahaa nin xagga xoolaha
    a) Caydh ka ah
    b) Hodan ka ah
    c) Meel dhexaad ah
    d) Midna


©SLNECB, 2023

**T. Ereyadani siday sheekada ugu jiraan ku macnee kuna hor qor:** **(10 dhibcood)**

1. Bogox ..........................................................
2. Silloon ..........................................................
3. Mooro ..........................................................
4. Okobban ..........................................................
5. Alkumasho ..........................................................
6. Is-taawin ..........................................................
7. Dhaban ..........................................................
8. Maagid ..........................................................
9. Gaadasho ..........................................................
10. Diirka ka qaaday ..........................................................

**QAYBTA LABAAD: MAANSADA** **(15 dhibcood)**

1. "Maayadda aqoontiyo cilmigu waa masallo weyne
Waa mawjad lagu soo hirtiyo maax la hoorsado'e
Wiilkuna hablaha kama mudnee ula mid weeyaan"

b) Soo koob dulucda guud ee tuducyadani xambaarsan yihiin (3 dhibcood)

..........................................................
..........................................................
..........................................................
..........................................................
..........................................................

t) "Gabaygan abwaanka tiriyey magaciisa sheeg (2 Dhibcood)

..........................................................
..........................................................
..........................................................
..........................................................
..........................................................



©SLNECB, 2023

2. "Gammaankii ka madhay dhooddi iyo galayaxeediiye
Gumburigii badh baa joogsadiyo goroyo-cawshiiye
Saryankii garbaha weyn lahaa geed ka kici waaye
Wuxu gooni-daaqii habsaday gubaddadii hawd"

   a) Soo kooban uga hadal waxa ku dhacay xawayaanka abwaanku ka hadlayo (2 Dhibcood)

   ..........................................................................................................
   ..........................................................................................................
   ..........................................................................................................

   b) Gumburiga iyo Saryanku maxay isaga mid yihiin? (2 Dhibcood)

   ..........................................................................................................
   ..........................................................................................................
   ..........................................................................................................

   c) Tixdan abwaanka tiriyey magaciisa sheeg ( 1 Dhibic )

   ..........................................................................................................
   ..........................................................................................................

3. "Sidii wiil tarrada ceel marshoo timaha deebeeyey
Tin madaw miyaan laga dayeyn aniga tuurkayga"

   a. Ereyga 'Tuurkayga' sheeg macnaha uu halkan ugu jiro (1 Dhibic)

   ..........................................................................................................
   ..........................................................................................................

   b. Waa maxay tilmaanta ay wadaagaan wiilka tarrada marsaday iyo Gabyaagu (2 Dhibicood)

   ..........................................................................................................
   ..........................................................................................................
   ..........................................................................................................

   c. Si kooban u sheeg ujeedka ay xambaarsan yihiin labadan tuduc (2 Dhibcood)

   ..........................................................................................................
   ..........................................................................................................
   ..........................................................................................................


©SLNECB, 2023

## QAYBTA SADDEXAAD: AFMALDAHANAHA (15 dhibcood)

1) "Maqal waxan ku haystaa, muslinkiyo waraabaha
Madmadawga tuhunkiyo, mashaqada dhex taallaa,
Inay tahay is maandhaaf. Muudaaga xooluhu,
Marka ay la kulantee, muuqiisa aragtay,
Lugaheedaa maashaa, isna wuxu majiiraha
Uga daba maleegtaa, celi maganta baadida,
Is maqiiqidiisiyo, mintidkiyo dedaalkaa,
Hadba muruq u siibtaa, Dee muxuu sameeyaa,
Ilkahaa u midigoo, micidaa u gacanee,
Aniguna mudducigoow, waxan meel la joogaa
Muran li' dhurwaagaas. "

a) Sheeg labada af-maldahane ee ku jira tuducyadan kor ku xusan (2 Dhibcood)
.......................................................................................................
.......................................................................................................
.......................................................................................................

b) Si faahfaahsan u sababee doorashadaada (3 Dhibcood)
.......................................................................................................
.......................................................................................................
.......................................................................................................

2) "Geeridiisa kii lagu farxee nabarka kuu geystay
Dibna loo gardaadiyey markii iilka lagu giijay
Galabtii la aasayna dhashaa jooga garabkaaga"

a) Is diidooyinka ku jira tuducyadani maxay yihiin ( 1 Dhibic )
.......................................................................................................
.......................................................................................................
.......................................................................................................

b) Af maldahanaha ku jira tuducyadan magaciisa sheeg (1 Dhibic)
.......................................................................................................
.......................................................................................................
.......................................................................................................

c) Si kooban u faallee doorashadaada (3 dhibcood)
.......................................................................................................
.......................................................................................................
.......................................................................................................


©SLNECB, 2023

3) "Taariikhda guunka ah haddaan gellin wax weydiiyey
Allaylehe Galbeed wuu ku jabay gobolladiinaas"

a) Ereyga 'Galbeed' muxuu u taagan yahay (1 Dhibic)

................................................................................................................
................................................................................................................
................................................................................................................

b) Sheeg Af-maldaha ku jira tuducyadan (1 dhibic)

................................................................................................................
................................................................................................................
................................................................................................................

c) Sababee doorashadaada (3 dhibcood)

................................................................................................................
................................................................................................................
................................................................................................................

**QAYBTA AFRAAD: MAAHMAAHYO IYO HEES HAWLEEDYO (10dhibcood)**

**B. MAAHMAAHDA**

1) "Oodi ab ka dhaw"

a) Sheeg maahmaahdan goorta la cuskado iyo ujeedka loo adeegsado (2 dhibcood)

................................................................................................................
................................................................................................................
................................................................................................................

b) "Ood kaa dheeri kuma dhaxan tirto" maahmaahdan iyo maahmaahda kor ku xusani maxay wadaagaan maxayse ku kala duwan yihiin (3 dhibcood)

................................................................................................................
................................................................................................................
................................................................................................................

**T) HEES HAWLEEDYADA**

1) "Balanbal shaalleeyeey buul shareereey
Ma maantaan bah kuu helayeey"

a) Hees hawleeda kor ku xusan goorma ayaa la adeegsadaa ( 1 dhibic)

................................................................................................................
................................................................................................................

b) Weedha ah "Maantaan bah kuu helay" maxay ka sheegaysaa hawsha la qabanayo (2 dhibcood)

................................................................................................................
................................................................................................................
................................................................................................................


©SLNECB, 2023

c) Hees hawleedan iyo hees hawleedda aloolku maxay wadaagaan maxayse ku kala duwan yihiin ee aanay wadaagin (2 dhibcood)

..........................................................................................

..........................................................................................

..........................................................................................

**QEYBTA SHANAAD NAXWAHA (10 DHIBCOOD)**

**Weedha Runta ah kor hor "R" Ta beenta ahna ku hor "B"**

1) Summadaha lagu garto magaca Af-Soomaaliga ah waa Laba qudha. ( )
2) Caynku waxa uu sheegaa Laboodnimada iyo dheddignimada magaca. ( )
3) Magaca ah "Ma-hayo-moog" waa Magac Guud, waayo waxa uu ka kooban yahay ereyo isku tegay. ( )
4) Falka Amar waxa uu ku dhammaadaa Shibbane qudha. ( )
5) Gooraynta iyo Sal-kordhintu waxa ay ka mid yihiin Summadaha Falka lagu garto.( )
6) Magac u yaalku shaqooyinka uu qabto waxa ka mid inu hadalka soo gaabiyo.( )
7) Sifada ama Tilmaame waxa uu raacaa falka mase raaco Magaca. ( )
8) Fal kaabku waa qaybta ugu muhiimsan qaybaha hadalka. ( )
9) Erey kaliya ma wada gali karaan hor-gale iyo daba-gale. ( )
10) Magac u yaalada lahaanshuhu waxa ay yeeshaan cayn. ( )

**QAYBTA LIXAAD: CURIS (20 dhibcood)**

**Labadan qodob ee hoos ku qoran mid ka mid ah qaado, kana qor curis aan ka yarayn 400 oo erey.**

a) Sida saaxiibada xumi u saameeyaan qofka
b) Waxtarka aqoontu u leedahay qofka iyo bulshadiisaba

..........................................................................................

..........................................................................................

..........................................................................................

..........................................................................................

..........................................................................................

..........................................................................................

..........................................................................................

..........................................................................................

..........................................................................................

..........................................................................................

..........................................................................................

..........................................................................................

..........................................................................................



©SLNECB, 2023

........................................................................................................................
........................................................................................................................
........................................................................................................................
........................................................................................................................
........................................................................................................................
........................................................................................................................
........................................................................................................................
........................................................................................................................
........................................................................................................................
........................................................................................................................
........................................................................................................................
........................................................................................................................
........................................................................................................................
........................................................................................................................
........................................................................................................................
........................................................................................................................

**DHAMMAAD**


©SLNECB, 2023